

**TUSMO KOOBAN OO KU AADAN DIIWAAN GELINTA
CUSUB EE WAXBARASHADA GURIGA**

Waxbarashada Guriga waxaa lagu qeexaa barnaamij waxbarasho oo ay kormeere ka yihiin waalidka ama masuulka sharciga ah ee ilmaha. Waalid doonaaya inuu kormeero waxbarashada guriga waa inuu Bayaanka Doonista soo gudbiyaa ugu yaraan 14 maalmood kahor intaan waxbarashada gurigu bilaaban.

Masuuliyadaha macalimiinta guriga waxaa kamid ah:

- Inay bayaanka Doonista soo diraan kaasoo sheegaaya waxyaabaha soo socda:
Magaca, taariikhda Dhalashada, heerka fasalka, iyo ciwaanka ilmaha, shahaadada waalidka, cadaynta talaalka iyo aqoonsiga. Bayaanka Doonista ayaa sanad kasta lasoo dirayaa ayadoo la soo raacinaayo xogta talaalka iyo natiijooyinka imtaxaanka guud hadduu jiro.
- Waa in waalidku kormeero koorsooyinka iyo sidoo kale qaabka casharka. Casharku waa inuu socdaa ugu yaraan 4 saacadood maalin kasta ugu yaraan 175 maalmood sanad kasta waana inay ku jiraan maandooyinka sharcigu amraayo.
- Waalidku waa inuu hayaa diiwaanka sanadlaha ah ee koorsooyinka ilmuhu qaatay iyo qiimaynada guusha waxbarashada ilmaha, ayna ku jiraan natiijooyinka imtaxaanaadka guud.
- Waa inuu diyaariyaa imtaxaanka asagoo adeegsanaaya farsamada imtaxaanka heerka qaran ee caadiga ah oo uu amraayo sharcigu ilaa in uu codsanaayo maahee shardi dhaaf ku salaysan Xeerka ND Century Code.
- Waa inuu u diraa diiwaanka ardayga, marka uu codsado kormeeraha guud ee maxaliga ah, haddii ardaygu galaayo dugsi dawladeed ama mid gaar loo leeyahay.

Haddii cunugaagu leeyahay IEP, hanaanka soo socda ayaa la raacayaa:

1. In la go'aansho sida adeegyada waxbarashada Gaarka ah ee cunugaaga loo bixinaayo.
 - a. Cunugaaga ayaa imaan kara dugsiga si uu u sii wato helista adeegyada waxbarashada Gaarka ah, ama waxaad keliya dooran kartaa qof kale oo shahaadada waxbarashada Gaarka ah haysa inuu adeegyada waxbarashada Gaarka ah siiyo cunuga.
 - b. Adiga ayaa masuul ka ah abuurista qorshe adeeg.
2. Haddii aad doorato in qof kale uu siiyo adeegyada waxbarashada Gaarka ah cunuga, u dir qorshaha adeegga Elisa Diederich:
 - a. Ugu dir boostada oo ah: 2400 47th Ave S, Grand Forks, ND 58201
 - b. Iimeelka oo ah: ediederich060@mygfschools.org
3. Haddii aad doorato in dugsigu sii wado siinta adeegyada waxbarashada Gaarka ah cunuga, la xariir maareeyaha kiiska ee cunugaaga si aad ula kulanto.
 - a. Kulankaas, waxaad uga hadli doontaan qorshaha adeegga, daqiiqadaha adeegga, waxaadna ku go'aaminaysaan marka daqiiqadaha adeegga la bixinaayo.
 - b. Daqiiqadaha adeegga ayaa ka duwanaan kara daqiiqadaha lagu baxshay IEP da cunugaaga.
4. Haddii cunugaagu qabo naafada garaadka, waxaad masuul ka tahay dirista ogaysiisyada hormarka oo ku aadan guulaha cunugaaga ee Nufeembar 1, Feebaraayo 1, iyo Maayo 1 aadna u dirto Elisa Diederich:
 - a. Ugu dir boostada oo ah: 2400 47th Ave S, Grand Forks, ND 58201
 - b. Iimeelka oo ah: ediederich060@mygfschools.org
5. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan kala soo xiriir Diane

lambarka (701)746-2230 Waan akhriyay waana fahmay waajibaadka i

saaran markaan ahay macalinka guriga.

Saxiixa WaalidkaMasuulka

Taariikhda